


# Sirta doorashada marka aad codaynayso

Uma baahnid inaad cidna u sheegto waxa aad u codaysay. Adiga ayaa sidoo kale go'aaminaya cidda aad u codaynayso.




## Keligaa marka aad qaadanayso waraaqda codbixinta

Waraaqaha codbixinta waxay yaalliin daaha gadaashiisa. **Waa inaad keligaa qaadataa waraaqaha codbixinta** si aan cid kale u arkin.

Haddii aad tahay naafo ama sabab kale aad ugu baahan tahay caawimaad, waxaad caawimaad ka heli kartaa shaqaalaha codbixinta.


Haddii aad rabto caawimaad qof kale, waa in shaqaale codbixin idin la joogo marka qofka kale ku caawinayo. Shaqaalaha codbixinta waxaa saaran waajibka sir ilaalinta.



## Keligaa ahow daaha codbixinta gadaashiisa

Marka aad qaadata waraaqaha codbixinta waa inaad diyaarsataa codkaaga. **Waa inaad keligaa joogtaa gadaasha daaha codbixinta.** Haddii aad u baahan tahay caawimaad waxaad waydiisan kartaa shaqaalaha codbixinta.

Haddii aad rabto caawimaad qof kale, waa in shaqaale codbixin idin la joogo. Shaqaalaha codbixinta waxaa saaran waajibka sir ilaalinta.



## Cidna ma raadraaci karto codkaaga

Marka aad diyaarsato codkaaga, shaqaalaha codbixinta ayaa qabanaya oo ku kaydinaaya halka ay yaallaan codadka dadka kale. Marka codadka la tirinayo, cidna ma ogaan karto in codkaasi adiga kaa yimid.

## Ma qabtaa su'aalo?

Waydii shaqaalaha codbixinta, la xiriir guddiga doorashada ee degmada ama booqo [www.val.se](http://www.val.se).